



## Miisaaniyada iyo Ballanqaadyada Dhaqaale

Waalidiinta iyo Shaqaalaha Dugsiyada Dadweynaha Portland ee Qaaliga ah:

Waxaa fooda inagu soo haya xilligii gu'ga, iyada waqtigaasi uu yahay xilliga la bilaabay dhisidaiyo qorsheynta miisaaniyada sanad-dugsiyeedka soo socda.

Maalintii Isniintii sidii ay u dhanneyd waxaan ku qaatay caasimada gobolka ee Salem iyada oo ay ila jiraan xubno kale oo ka tirsan Golaha Waxbarashada, maamulayaasha Dugsiyada Dadweynaha Portland iyo aqoonyahano iyo waliba iskuulada degmada gobolka Oregon sidii aan ugu doodi lahayn in waxbarashada la galiyo dhaqaale dheeraad ah iyada oo la taageerayo waxbarashada K-12 iyo iskuulada degmadeena. Gobolka waxa soo waajahay hoos u dhac miisanayadeed oo lagu qiyaasay \$1.7 bilyan oo doolar, iyada miisaaniyada loo soo jeediyey Guddoomiyaha Gobolka iyo golaha xeer dejinta ee iskuulada K-12 uunsan ahayn mid ku filan sidii loo sii wadi lahaa addeegyada hadda la bixiyo.

Waxaan anigu aad ugu rajo weynahay in ay dhici karto in gobolku helo dakhli cusub oo uu meesha kaga saaro hoos u dhaca miisaaniyada, laakiin waa in ay inaka inaga go'naantaa in aan ka falcelino si degnanaan ku jirto marka aan dejineyno miisaaniyadeena sanad-dugsiyeedka 2017-18. Taasi macnaheedu waxa weeye inaan u diyaar garownay inaan noqon kuwo u furan dabacsanaanta ugu sareysa marka aan dhiseyno in aan isku fileysiino waxa aan haysano; sidaas darteed wax waan ka qaban karnaa waxyaabaha aan la hubin inay dhici karaan ee gobolku inagu waajibiyey inaan qabano, wada xaajoodka noo socda macalimiinta ee dhinaca mushahaaroyinka ah iyo korodhka qiimaha lacagta hawlgabka ee PERS.

Golaha Waxbarashada PPS waxaa lagu wargeliyey markii ugu horeysay todobaadkan horaantiisii fursadaha la dooranayo ee shaqaaleysiinta sanad-dugsiyeedka 2017-18. Ilaa uu gobolku gaarsiiyo heerka addeega hadda uu u bixiyo miisaaniyadiisa oo dhan \$8.4 bilyan, Dugsiyada Dadweynaha Portland oo ay la jiraan dugsiyada degmooyinka kale, waxaan u baahan doonaan in aan shaqaalaha iskuulada jarno. Shaqooyinkani la jarayaa aad bay dhibaato u yihiin, laakiin higsigayagu wuxuu yahay in aan sii wadno saamigii isku dheelitirka macalimiinta iyo ardeyda oo ay ku jiraan degmooyinka oo dhama

Waxaan sii hayneynaa qiyaas ugu yaraan 60 jago oo aan awood u leenahay inaan ku soo kordhino shaqaalaha la dhimayo marka loo eego baahiyaha kale gedisan ee iskuulada, anaka oo kala sii shaqeyn doono maamulayaasha barnaamijyada sanadka soo socda ayna naga go'an tahay sinaanta waxbarashada, ku guuleysiga waxbarashada, caafimaadka iyo nadabgelyada ardeyda.

Xafiiska maamulka ee xarunta dhexe sidoo kale waxaa soo waajihi doona in shaqaalaha iyagana la dhimo in door ah. Nidaamka loo horumarinayo miisaaniyada hawlgalada xarunta dhexe iyo taageerada iskuuladu waa ay socotaa iyada oo todobaadada soo socda loo soo bandhigi doono Golaha Waxbarashada taasi oo isha lagu hayo sidii loo abuuri lahaa inuu noqdo mid wax ku ool ah oo dhimistaasi noqoto mid raadka ay ku reebeyso noqdo wax aad u yar marka aad eegto dhinaca caafimaadka iyo nabadgelyada, sidoo kalena taageeradii la siinayey iskuulada.

Waxaan kale oo aan u gudbiney ballanqaadkii miisaaniyadeed ee wax laga qabaneyey Caafimaadka, Nabadgelyada iyo Dib-u-cusbooneysiinta iskuulada oo diirada lagu saarayo xaaladihii aan fiicneyn ee dugsiyada degmada dhammaantood si tallaabada tani xigta loo qaado in dhammaan la cusbooneysiyo dhismayaasha iskuulada sanadaha soo socda. Qof kastaa wuxuu fursad u heli sidii uu ugu codeyn lahaa Ballanqaadka Dhaqaale Horumarinta bisha Maayo 16keeda.

Labadani mudnaanta la siiyey waxay si isku mid ah loo sii wadi doonaa iyada oo la dheelitirayo in la ilaaliyo casharada fasalada iyo iyada oo la siinayo taageero ku filan hagaajinta dhismayaasha si loo xaqiijiyo in dhammaan ardeydeena aan siino jawi waxbarasho oo cid waliba ay heleyso wax loo siman yahay oo nabad ah.

Waa idinla socodsiin doonaa halka wax marayaan iyo fursadaha ay bulshada kaga qeybqaadaneyso, sidoo kalena warcelinta sida aan mudnaanta u siineyno wax aanu hayno ee sanad-dugsiyeedka soo socda.

Waad ku mahadsan tihii taageeradiina aad siisaan Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS).

Tom Koehler

Guddoonka, Golaha Waxbarashada Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS)